مركز المقاصد للبحوث والدراسات

XARUNTA CILMIBAARISTA IYO DARAASAADKA MAQASID
MAQASID CENTER FOR RESEARCH AND STUDIES

# FEDERAALAYNTA SOOMAALIYA: SIYAASAD MURUGSAN MISE WAA TUBTA WAX WADA LAHAANSHAHA BUUXDA

## SU'AALO KU AADDAN AAYAHA IYO SUURAGALNIMADA XASILOONIDA

## (FAHAM KA DHIMBILA QAADANAYA HAB-XUKUNKA ISLAAMKA IYO MAQAASIDDA SHAREECADA)

**SHIR-CILMIYEEDKA 5AAD 2025**



# HORDHCA

Hannaanka Federaalaynta marka laga eego sida loo qaadaa dhigo cilmi ahaan, iyo dhaqa-ngelintiisa sharci iyo siyaasad, qaab-dhismeedka maamul, iyo heerka aqbalaadda bulsho weynta, waxaa soo baxysa mushkilad aad u mug weyn oo soo jiidatay xiisaha cilmi-baarayaal, siyaasiyiin, khubaro iyo aqoonyahanno doonaya in ay si qoto dheer u falanqeeyaan, sidoo kalena u turxaan bixiyaan mushkilaaddaas ka muuqata macnaha Federaalka, taas oo ah dabacsanaan markay aragti tahay iyo qallafsanaan marka ay dhaqngelin noqoto.Taas oo ah laba arrimood oo is hirdinaya: "dabacsanaan & qallafsanaan" oo saamyayn ku leh hannaanka federaalka ka dhaqan-galay dunida guud ahaan iyo gaar ahaan Soomaaliya.

Illaa iyo markii la qaatay nidaamkan Federaalka, saaxadda siyaasadeed ee dalku waxa ay noqotay mid la baaxaa degaysa himilooyin iyo cabsi is barkan: dhan waxaa loo arkaa tub lagu xaqiijin karo wadaag iyo wadashaqayn, cadaalad haddana ay dhinac socoto cabsi laga qabo in nidaamka federaalku uu sii xoojiyo kala qaybsanaanta, iyo in loo bayro doojinta danaha gaarka ah si deegaamysan ama qabiilaysan, taas oo horseedi karta xasarado siyaasadeed oo joogto ah, oo ka dhex alloosama  Dawladda dhexe iyo maamullada xubna-ha ka ah, taas oo saamayn taban ku reebta Geeddi-socodka dawladnimada, joogtaynta horomarka bulsho iyo adkaynta hay'adaha dawaladnimo.

Sidaa darteed, Xarunta Maqasid ee Cilmi-baarista iyo Daraasadahu, waxaa ay ku soo bandhigaysaa shirkeeda sannad laha ah ee 5aad su'aal muhiima oo ah:

Nidaamka federaalka Soomaaliya ma loo bedeli karaa dhaliilihiisa dheef, qalalaasihiisana xasillooni, iyadoo la marayo jidka wadashaqayanta iyo waxwadyeelashado buuxda?
Su'aashani waxay si toos ah ugu xiran tahay ujeeddooyinka hannaan xukunka Islaamka, yoolalka Shareecada, oo ilaalinaya jiritaanka ummadnimo, Danta dadweynaha, Caddaaladda, sharafta, iyo isku duubnaanta bulsho. Fiqhiga xukunka Islaamku ( Al-siyaasa Sharciyyah) kuma koobna oo kaliya doodo aragti uun ah, ee waxaa uu soo bandhigaya hannaan cilmiyaysan oo lagu  lafa-guri karo waxaa ka jira saaxadda siyaasadeed, ayada oo ujeedku yahay hirgalinta yoolalka guud ee shareecada.

Sidaa awgeed Shirkan oo cinwaankiisu yahay " **FEDERAALAYNTA SOOMAALIYA: SIYAASAD MURUGSAN MISE WAA TUBTA WAX WADA LAHAANSHAHA BUUXDA" (Su'aalo ku aaddan Aayaha iyo suuragalnimada Xasiloonida)**

## WAXAA UJEEDKIISU YAHAY:

- Falanqaynta Federaalka Iyadoo Lagu Eego Diiradda Ujeeddoyinka Guud Ee Shareecadda Oo Isku xidhiidhinaysa Fiqhiga Iyo Waaqaca Jira.
- Dabagalka Ilaha Xiisadaha Siyaasadeed Iyo Qiimeynta Saameynta Ay Ku Leeyihiin Midnimada Qaranka Iyo Dhismaha Hay'adaheed, Iyo Soo Bandhigidda Xalka.
- Raadinta Siyaabaha Lagu Heli Karo Xasilloonida, Wax Wada-Yeelasho Guud Oo Caadil Ah Si Loo Hago Laamaha Dawladda Ee Fulinteeda Leh.
- U Jihaynta Aragtida Xagga Mustaqbalka Iyadoo Laga Gudbayo In Lagu Koobnaado Argtiyo Iyo Dhacdooyin Hore, Lana Kaashado Tusmooyin Iyo Naqdin Hufan Taas Oo Ballaarinaysa Baaxadda Aragtida.
- In La Cuskado Hab-Raac Aqooneed Ku Salaysan Waxyiga Si Loola Tacaalo Dhibaatooyinka Siyaasadda Bulsheed Oo Diinta Islaamku Ay U Ahaato Salka Wax Lagu Xalliyo.
- Kor u qaadidda fahamka in aadanuhu yahay maareeyaha arrimaha dunida (Khaliifka dunida), taas oo ay gundhig u tahay islaaxin, hanashada masuuliyada iyo maamul wanaag.

**Sidaa awgeed shirku waxa uu fidinayaa madal aqooneed iyo dood cilmiyeed u dhexeysa cilmi-baarayaal, khubaro, iyo xil-qaadayaal. Ujeeddadiisuna ay tahay in tallaabo hore looga qaado muranka ku kooban la tacaalidda xiisadaha, loona gudbo xalka, ayada oo laysku sidkayo fikirka iyo waaqica, hiddihii hore iyo maanta, si nasteex leh u soo bandhigaysa su'aalo ku aaddan siyaabaha suura galiya xasillooni siyaasadeed, xilka saaran hormuudka bulshada iyo hay'adaha dhisa aayaha ummadda, taas oo ah tiirarka lagu heli karo dal dadkiisu ay badhaadhaan, dhallintiisuna ku xasilaan.**

## TUSMOOYINKA KA-QAYBGALKA SHIRKA:

- Climibaarisyo Hore Uu Qoraagu U Soo Saaray Waa La Aqbali Karaa, Haddii Ay Waafaqaan Shuruudaha Cilmi-Baarista, Waase In Aan Looga Qayb Galin Shir Kale.
- Codsiga Ka-Qaybgalka Waa Inuu Ka Kooban Yahay: Hindise Cilmi-Baadhis Ay Ku Lifaaqan Tahay Taariikh Nololeed (Cv) Kooban, Koobidda (Abstract) Cilmibaarista Oo U Dhexeysa 200–300 Eray.
- Koobidda (Abstract) Waxaa Lagu Daabici Doonaa Bug-Yaraha Shirka Oo La Siin Doono Ka-Qaybgalayaasha.
- Qoraalka Af-Carabiga Waa In Loo Adeegsadaa Farta Sakkal Majella, Qoraal-ka Guud Oo Uu Cabbirkiisu Ahaado 16, Tixraacyaduna Ahaadaan 12.
- Tixraacyada Waa In Si Gooni Ah Loogu Taxo Gunta Bog Kasta.
- Liiska Ila Cilmibaarista (Maraajicda) Waa In Lagu Xusaa Dhammaadka Cilmi-Baarista.
- Cilmibaarista Dhamaystirani Waa Inay Xustaa Gungaaris & Talo-Bix-inno Wax-Ku-Ool Ah.
- Cilmibaaristu Waa Inay U Dhexeeysaa 15 Ilaa 30 Bog.
- Cilmibaarista Waxaa Lagu Soo Gudbin Karaa Afafka Carabiga, Soomaali Iyo Ingiriisiga.
- Koobidda (abstract) iyo waraaqaha Cilmibaarista oo dhamaystiran waxaa lagu soo dirayaa emailka markazka: info@maqasid.so

## FAA'IIDOOYINKA KA-QAYBGALKA:

- Soo Koobidda Cilmibaarista Qoraaga Waxaa Lagu Dari Doonaa Bug-Yaraha Shirka.
- Cilmibaarisyada Dhamays Tiran, Marka Dib-U-Eegis Lagu Sameeyo, Waxaa Lagu Daabici Doonaa Buugga Shirka.
- cilmibaarisyada ugu heerka sareeya tixgelin ahaan waxaa lagu daabacayaa joornaalka Xarunta.
- Ka-Qaybgalayaashu Waxay Heli Doonaan Caddayn/ Shahaado Tilmaamaysa Ka-Qaybgalkooda.

## MOWDUUCYADA SHIRKA 1AAD:

### Mabda'a Federaalka, Tixraaciisa Sharci ahaan iyo Ujeedooyin ahaan:

1. Hannaanka Federaalka : Fikradda, Unkamidda, Astaamaha, Iyo Waaqica.
2. Is bar bar dhig asalka fikradda Federaalaynta sooyaalka Islaamka iyo kan reer galbeedka.
3. Aasaaska iyo ujeedooyinka sharciyeed ee nidaamka xukunka iyo awood-qaybsiga.
4. Maqaasidda shareecada iyo kaalinteeda xaqiijinta midnimada, maareynta khilaafka.
5. Hannaanka xukunka Islaamka ( Siyaasa Al-sharciyah) iyo nidaamka Federaalku sida ay isula fal galayaan.
6. Hannaanka Federaalka oo lagu eegayo isha ujeedooyinka shareecada: bedelka haboon.
7. Maqaasida ilaalinta kulliyada (danaha guud ee sharciga) ee dhismaha federaalka: sii wadidda horumarka iyo dib-u-kicinta.

## MOWDUUCYADA SHIRKA 2AAD:

**Nidaamka Federaalka Iyo Saameynta Uu Ku Leeyahay Siyaasadda Dastuurka Iyo Garsoorka:**

1. Falanqaynta Dastuurka JFS iyo sida uu uga hadlay Hannaanka Federaalaynta: caqabdaha iyo toosintooda.
2. Dhibaatoyinka siyaasadeed ee hortaagan federaalyanta Soomaaliya: waaqica iyo wixii lagu bededli lahaa.
3. Awood qaybsiga Dawladda dhexe iyo dawlad-goboloodyada: mushkiladaha jira iyo xalkooda.
4. Nidaamka federaalka iyo dhismaha Garsoor damaanad qaadi kara xuquuqda iyo waajibaatka: cadaalad waarta sidii loo heli lahaa.
5. Cadaallada Garsoorka iyo awood qaybsiga heerarka federaalka iyo goboleedka: gar-bixinta loo baahanyahay.

6. Caqabadaha sharci dejineed iyo xallintooda: carqaldaha jira iyo sidii looga gudbi lahaa.

7. Saamaynta rabitaanka wadar oggol ah ku leeyahay helidda siyaasad xasilloon.

8. Federaalka oo ay kala jiidanayaa dawlad sharci ku dhaqanta iyo fikir qabyaaladaysan!

9. Casharro laga baran karo nidaadmyo federaal oo hirgalay.

10. Doorka ay maqaasidda shareecadu ku leedahay xoojinta hufnaanta iyo sarraynta sharciga.

## MOWDUUCYADA SHIRKA 3AAD:

### Horumarinta Dhaqaalaha, Maareynta Khayraadka, iyo wada-jirka Bulshada:

1. Qaybinta Khayraadka Iyo Hantida Ee Nidaamka Federaalka; Istaraatiijiyada Cadaaladda.
2. Ujeedooyinka Caddaaladda Dhaqaale Ee Federaalka; Xoojinta Xuquuqda.
3. Caqabadaha Horumarinta Gobollada Si Isle'eg Iyo Sidii Loo Suurtagalin Lahaa: Awoodaha Cadaaladda.
4. Hannaanka Federaalka iyo ka faaiidaysiga khayraadka dabiiciga ah.
5. Doorka uu nidaanka federaalku ku leeyahay xojinta ama diciifinta isku duubnaanta bulshada.
6. doorka waxbarashadu, iyo warbaahinta ku leedahay kobcinta dareenka haybta qaran iyo dhiirrigelinta wax wad-lahaanshaha.
7. Kaalinta uu hoggaan dhaqameedku ku leeyahay kobaca nidamka federaalka.

## MOWDUUCYADA SHIRKA 4AAD:

### Amniga, Xasilloonida, Iyo Maamul-Wanaaga Ee Nidaamka Federal Ah.

1. Xaaladda Amniga Qaranka Ee Dhexda U Taal Dawladda Dhexe Iyo Dawladaha Xubnaha Ka Ah Federaalka.

2. Amniga qaranka iyo kaabayaasha xasilloonida iyo kartiyada xalint khilaafaadka; dhisidda nidaam amni mustaqbal ahaan.

3. Maqaasidka Shareecada Ee Ku Hawlan Ilaalinta Nolosha Iyo Nabadda Guud.

4. Tabaha Dastuuriga ee xallinta khilaafaadka; tixraacid iyo xoojin.

5. Dib-u-habaynta hay'adaha iyo dhisidda maamulwanaaga; dhawrsanaanta maamulka.

6. Federaalaynta iyo tayaynta hogaanka maamul ee heerarka kala duwan.

6. Kobcinta Awoodaha Hoggaamiyeyaasha Maamulka Hoose: Habraaca iyo Higsiga Is-beddelk

## MOWDUUCYADA SHIRKA 5AAD:

### Xiriirka Dibadda iyo Mustaqbalka Federaalka Soomaaliya:

1. Doorka federaalka ee kor uqaadista meeqaamka Soomaaliyeed ee aduunka.

2. Siyaasadda arrimamha dibadda ee nidaamka federaalka jidka loo mari lahaa iyo awoodda la gelin lahaa.

3. Aragtida maqaasidda ku dhisan, iyo mustaqbal xukunka Soomaaliya; fiiro iyo falanaqayn.

4. Kaalinta aqoonyahannada iyo dhaqanku ku yeelan karaan isu soo dhweynta dawladda dhexe iyo dacallada dalka: dood wadaag qaran.

5. Qiimeynta Federaalka isagoo loo arkayo nidaam loo xushay horomarinta dalka.

## Taariikho Muhiim ah

| | MAGACA HAWSHA: | TAARIIQDA FULINTA: |
|---|---|---|
| 1 | Furitaanka gudbinta koobidda (abstract) | 25 Sebteembar 2025 |
| 2 | Ogeysiisnta cilmi-baarayaasha la doortay | 30 Oktoobar 2025 |
| 3 | Soo gudbinta cilmi-baarista oo dhammays tiran | 30 Nofeembar 2025 |
| 4 | Ogeysiisnta aqbalidda cilmi-baarista iyo jadwalka shirka | 10 Diseembar 2025 |
| 5 | Kulancilmiyeedku waxa uu qabsoomi doonaa labo malin | (Arbaco iyo Khamiis) 24-25 December 2025 |

مركز المقاصد للبحوث والدراسات

XARUNTA CILMIBAARISTA IYO DARAASAADKA MAQASID

MAQASID CENTER FOR RESEARCH AND STUDIES

2025 FIFTH SCIENTIFIC CONFERENCE 2025

المؤتمر العلمي الخامس

5TH


+252 616 434 280
+252 617 500 427

www.maqasid.so
info@maqasid.so

Zobe-Hodan
Mogadisho - Somalia

@maqasidcenter